



**Porter oo
Lagu Mudayo
Faleebbe**

Ku soo dhawoow Porter oo Lagu Mudayo Faleebbo !

Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo bukaanada helaya qalabka lagaliyo xidida dhiiga. Waxay faahfaahinaysaa habka lagu helayo IV si ay bukaanada ugu fahmaan nidaamka, ogaadaan waxa laga filayo, iyo inay yarayso walaaca kasta kahor qaliinka.

Sheekadu waxay dabasocotaa eey la yiraahdo Porter oo isku diyaarinaya oo helaya IV. Buug-yarahaan wuxuu ku dhammeystiran yahay sawirrada habka Porter iyo qalabka lagu isticmaalo gacmaha caruurta ee manikins saddex meelo (gacan, cudud, antecube) si loo arko aragtida dhabta ah ee IV. Bukaanada aan dooneynin inay arkaan xariijinta gacan manikin, sawiradan waxay kasoo muuqan doonaan dhabarka buug yaraha waxayna ku jiraan bog madhan oo kahoreeya sawirrada si looga sooco inta kale ee sheekada.

In kasta oo dhakhaatiirtu u sameeyeen sheekadan carruurta, qof kasta wuu isticmaali karaa si ay ugu raaxaysto nidaamkooda.

Tilmaamaha ku saabsan sida loo ururiyo buugga iyo walxaha aad u baahan tahay ayaa lagu soo dari doonaa bogga xiga, kadib sheekadu waxay bilaaban doontaa.

Aad baan ugu mahadcelinaya Jackie Lutes, BSN, RN, CPN, VA-BC™ iyo kooxdeeda ee Children's Minnesota ee abuurista sheekadan iyo wada shaqaynta Vascular Access Certification Corporation si ay ula wadaagaan bukaanada kale. Fikirkaaga iyo dadaalkaaga aad ku gaarsiinaysa bukaanada inay dareemaan inay nabad yihiin oo ay diyaar yihiin ayaa si qoto dheer loo qiimeeyaa

Akhris farxad leh!

Sida loo ururiyo buug-yarahaaga

- 1. Soo deji oo daabac bogagga buug-yaraha.**
- 2. Geli bacda ilaalisa bogagga.**
 - a. Tani waxay hubinaysaa in buug-yaraha oo dhan la tirtiri karo isticmaal kasta kadib si looga hortago wasakhda iyo in bogagga la ilaaliyo.
 - b. Hubi in bogagga ay ku habboon yihii giraanta buug-sameeyaha si fudud loo isticmaalo.
- 3. Isku ururi bogagga buug-sameeyaha 3-giraan. Buug-sameeyaha wuxuu leeyahay laba ujeedo:**
 - a. Waa sahlan tahay in la nadiifijo inta u dhaxeysa isticmaalka.
 - b. Waxaa loo isticmaali karaa in looga hortago bukaanada inay arkaan habka kuwa leh walaaca ama aan dooneynin inay daawadaan.
- 4. Ku dar walxaha soo socda ee jeebka hore ee buug-sameeyaha loogu talagalay kuwa wax taabto baranaya:**
 - a. Tourniquet
 - b. Tuubada fidinta IV
 - c. Dabool aan irbada lahayn (ku xiran tuubada IV)
 - d. Kateetarka IV ga ee cabirka yar (irbad laga saaray)
 - e. Biyo nadiif ah oo cusbo leh oo madhan
 - f. J-tip adapter (aan la isticmaalin laakiin hawada laga saaray si bukaanku uusan u furin)

Fadlan ha ku darin walxo aan dib loo isticmaali karin oo aan la nadiifin karin. Haddii bukaanku xiiseynayo walxaha sida cajalad ama duub, tus iyaga bedelkeeda.

Porter faleebbe ayuu ka
qaadanayaa daawo iyo biyo inta
uu isbitaalka ku jiro.

Porter faleebba ayuu ka
baqayaa, laakiin kalkaaliso
ayaa u fududeynaysa oo waxay
tuseysaa waxa faleebbuuhu yahay
iyo sida uu u caawin doono.





Porter waxa uu fahmayaa in faleebbaha yahay tuubbo dhuuban oo gasha xidid oo jirka ayaa laga siinaya cabitaan iyo daawooyin. Xidikuna waa tuubbo oo maqaarka ayuu ka hooseysa oo dhiiggu ayaa jirka kale ka sii aada.


Ka hor inta aan faleebbaha lagu mudin, k alkaalisada ayaa u sharxeysa Porter in ay jiraan laba daawo oo kala duwan oo ka caawin kara dareenka xanuunka.

Porter waxa uu kala dooranaya daawooyin ah kabuubyo nooca uu rabo.

Daawada koowaad waxaa la yiraahdaa J tip (Kabuubyeyso). J tip (Kabuubyeyso) waa qalin buufis ah oo meel maqaarka ah dareenka ka celineysa si daawo xididka loogu mudo si fudud oo aan xanuun lahayn.

J tip (Kabuubyeyso) ayaa la dulsaarayaa maqaarka Porter, oo kalkaalisaada ayaa batoon riixeyso. Waxaa la maqlayaa dhawaaq dheer, oo

Porter wuxuu
dareemaya
xatoxato ilaa
hal ilbiriqsi. J tip
(Kabuubyeyso)
ayaa lagu
buufinaya
meel ka mid ah
maqaarkiisa.



Daawada labaad waa kareem. Kalkaalisaada ayaa ciddiyihiiisa ku tuujineysa kareemka oo istiikar yar ayey ku dhejineysaa. Kareemku wuxuu muuqanayaa ilaa 30 daqiiqo, ka dibna kalkaalisaada ayaa ka fujineysa istiikarka oo masaxaysa ciddiyihiiisa.



Porter hadda wuxuu diyaar u yahay faleebba! Porter ma is dhaqaajinayo ilaa kalkalisadu cududda uga xirto laastiig jiidma oo buluug ah. Wuxuu Porter dareemayaan in si adag looga xiray cududda gacantiisa.



Xargaha fidsan waxaa la yiraahdaa dhiigceliye oo ka lkaalisada ayaa ku heleysa xididkiisa.

Porter kalkalisadiisa gacmagelis ayey u xiraneyso, si uusan Porter jeermis u gaarin.

Marka xigta kalkaalisada ayaa faashad ku masaxeysa qeybta kore ee ciddiyihiiisa. Wuxuu ciddiyaha ka dareemayaa qabow iyo qoyaan.



Faashadda waxaa lagu nadiifinayaay Porter maqaarkiisa ka hor intaan faleebbaha lagu mudin. Jeermis ma jiro!





Porter wuxuu ku mashquulayaa
hees loo qaadayo, ama wuxuu
daawanayaan buug/shaashad
xalleefsan, Kalkaalisaada ayaa u
tirineysa tiro ah ilaa saddex koow...
Labo... Saddex.

Porter waxa uu dareemayaan
cadaadis yar oo ah ciddiyihiiisa,
oo marka uu hoos firriyo, wuxuu
arkayaan in faleebbe loogu xiray
maqaarka hoostiisa. Kalkaalisaadu
waxay ku dhaheysaa ma aadan
dhaqaajin ciddiyahaaga oo hadda
waxa keliya ee harsan waa in
faleebbaa laguugu dhejiyo istiikar.



Kalkaalisu waxay faleebaha ugu
dul dhejineysaa istiikar ah nooca
balanbaalista.

Kalkaalisu waxay dhahaysaa,
"Istiikarka balanbaalista waxa uu
celinaya faleebahaaga, si uusan
lugahaaga uga soo bixin".

Dhiigceliyihii ayaa laga soo saarayaa!

Kalkaalisdadu waxay ku dhejineysaa saliinge yar oo ay biyo ku jiraan. Saliingaha biyuhu ku jiraan bistoolad ahaan ayey kalkaalisdadu uga saareysaa markay riixdo. Kalkaalisdadu waxay biyaha saliingaha ku shubeynsaa xididka faleebbihii lagu xiray. Biyahan waxaa la yiraahdaa nadiifinta xididka ama "biyaraacin".

Porter hadda waxa uu daawadiisa iyo dareereyaal ka qaadanayaa faleebba.





Kalkaalisadu waxay istiikar weyn ku dhejineysaa dusha sare ee faleebbaha cusub. Istiikarku waa sida sharootada Band Aid oo faleebbaha cusub ayey meeshiisa ku hayneysaa. Kalkaalisada ayaa markaas waxay Porter ku dhahaysaa waa kuu dhammaatay!

Porter ma rumey san karo. “Waan adkeystay!” ayuu wahwah dhahaya.

Talooyinka mudista faleebbaha

Mashquulin:

Buugaag, shaashado xalleefsan, taleefan, muustiko, iyo alaab lagu ciyaaro. Waa waxa ilmaha u noqon kara mashquulin si aysan u daawan faleebbaha lagu mudayo. Waxaa fiican in waxa lagu mashquulinayo loo dhigo dhinaca ka soo horjeeda meesha PIV la dhigayo si ilmuu uusan u arkin hawsha loo qabanayo ee muhiimka ah.

Habka Qabashada:

Miyuu ilmuu ku xasilayaan inaad ku qabato gacmahaaga? Fariisin fiican? Weydii dhakhtarka sida loo qabto ee ay ku degi karaan ilmaha marka faleebbe lagu mudayo.

Qolka daaweynta:

Qolka daaweynta waa qol gaar ah oo lagu qabto hawlaha caafimaadka. Waa meel u fiican badqabka ilmaha marka loo qabanayo hawl ah caafimaadka. Haddii aad rabto qolkaan, weydiiso shaqaalaha haddii laguu heli karo meel la mid ah qolkaas.

Waalidka, waa ay ka bix i karaan qolka haddii aysan la joogi karin ilmahooda la caawinayo. Shaqaalaha ayaa daryeeli doona ilmaha oo kuu keeni doona marka hawshu u dhammaato.

Haddii ay waalidku la joogayaan, waa in ay iyagu is dejyaan oo ay ilmaha aayar u caawiyaan sababtoo ah il maha ayaa ku dayanaya. Haddii aad qabto wax ah su'aalo ama walaac, fadlan weydii shaqaalaha.



**Dhinaca kale ka eego gacmo
ah boombale oo uu faleebbe
ku xiran yahay.**

